Bayaan ku saabsan dhowridda amniga qofka marka la gelayo imtixaamka noorwiijiga, imtixaanka cilmiga bulshada iyo/ama imtixaanka qaadashada dhalashada

1. Ka baaraadegida xoga shakhsiyeedga marka la gelayo imtixaamka afnoorwiijiga, imtixaanka cilmiga bulshada iyo/ama imtixaanka qaadashada dhalashada

Marka aad isqorto iyo/ama aad gelayso imtixaanka noorwiijiiga, imtixaanka cilmiga bulshada ama imtixaanka qaadashada dhalashada, waxaanu eegi doonaa xogahaaga shakhsi ee adiga kugu saabsan. Hoos waxaad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan xogaha shakhsi ee aan eegi doono, sababta aan uga baaraandegayno xogahaaga shakhsiyeed , iyo xuquuqahaaga ku aaddan ka baaraandegida xogaha shakhsi.

Cidda masuul ka ah ka baaraandegida waa Agaasinka waxbarashada sare iyo aqoonta (HK-dir). Taas macnaheedu waxa weeye in HK-dir ay masuul ka tahey sida xogahaaga shakhsiyeed ee HK-dir.

2. Waa maxey sababta aan uga baaraandegayno xoga shakhsiiyeedka kugu saabsan?

Waxaan ka baaraandegnaa xogahaaga shakhsiyeed ee kugu saabsan, oo weliba ay ka mid yihiin xogaha shakhsiyeed ee xasaasiga ah, marka loogu baahdo si loo fuliyo hawlo la xidhiidha ujeedadayada. Ujeedadayadu waa inaan siino ajinebiga aqoon iyo xirfado ay kaga qaybgalaan nolosha bulshada noorwiijiga, iyo sidoo kale inaan qaadno imtixaanno si loo caddeeyo aqoonta afnoorwiijiga iyo aqoonta cilmiga bulshada

Waxaan tan u samaynaa si waafaqsan GDPR qodobka 6 lambarka. 1 e) iyo sharciga isdhexgalka § 41 (1) b) iyo/ama c) sidoo kale xeerka isdhexgalka § 54. Marka aan Ka baaraandegayno xogaha shakhsi ee xasaasiga ah saldhiggu waa qodobka GDPR 9 lambar. 2 xarafka g) iyo sharciga isdhexgalka § 41 (1) b) iyo/ama c). Marka aad imtixaan gelayso, waxaanu leenahay xaq iyo waajibaad qaanuunka waafaqsan si aan uga baaraandegno xogaha shakhsiyeedka kugu saabsan sida ku xusan liistada hoose.

Waxaan soo qaadaneynaa oo isticmaaleynaa xogahaaga shakhsiyeed si aan u fulino hawlahan:

- Hubinta tayada iyo gelida imtixaamka afnoorwiijiga, imtixaanka cilmiga bulshada iyo/ama imtixaanka qaadashada dhalashada
- Maamulida imtixaannada ee goobta imtixaanka
- Loo dhowro xuquuqda inaad ka dacwoon karto go’aan dacwad laga qaadan karo
- Tirakoob
- Cilmi-baadhis iyo falanqeyn

Sida uu dhigayo sharciga isdhexgalka § 41 (1) c) iyo xeerka isdhexgalka § 64 waxa la isticmaalayaa go’aan qaadasho otomaatik ah marka la saxayo imtixaanka akhrinta- iyo dhegaysiga ee afnoorwiijiga, imtixaanka cilmiga bulshada iyo imtixaanka qaadashada dhalashada.

Saddexda imtixaan waxey ka koobanyihiin su'aalo badan oo xulasho ah oo ay hal jawaab oo keli ahi sax tahey. Xadka loogu tala galey tirada jawaabaha saxda ah ee lagu gudbayo imtixaanka, iyo sidoo kale jawaabaha saxda ah, ayaa hore loo sii qorsheeyay oo hore loogu sii diyaariyey nidaamka imtixaanka. Dhibcaha ugu dambeeya ee qofka la siinayaa waa wadarta dhibco oo ku saleysan tirada jawaabaha saxa ah, jawaab kasta oo sax ah waxa lagu bixinayaa hal dhibic.

Go'aamo otomaatig ah looma isticmaalayo marka la saxayo imtixaannada qoraalka iyo afka ah ee afnoorwiijiga, maadaama imtixaannadaas ay saxayaan imtixaamqaadayaal goob joog ah iyo imtixaan saxayaal.

Go'aamada otomaatiga ah waxa gacanta ku ilaalin kara Agaasinka waxbarashada sare iyo aqoonta. Haddii ay jiraan tuhunno/ duruufo muujinaya in ay dhaceen cillad farsamo ama khalad kale Agaasinka waxbarashada sare iyo aqoonta ayaa dib u hubin doonta nidaamka imtixaanka iyo natiijada imtixaanka.

3. Xaggee ayaanu ka soo qaadaneynaa xoga shakhsiyeedka?

Waxa maclumaadka na siinaya adiga iyo masuuliyiinta hay'adaha dawlada ee kale. Masuuliyiintaas hay'adaha dawlada waxa ka mid ah tusaale ahaan:

- Hay'ada isdhexgalka iyo kaladuwanaanta (IMDI)
- Degmooyinka/goobaha imtixaannada
- Badhasaabka gobolka (oo ah hay'ada ugu dambeysa ee loo dacwoodo)
- Agaasinka ajinebiga (UDI)
- Wasaaradda shaqada- iyo isdhexgalka bulshada
- Xafiiska diiwaanka dadka

4. Xogo shakhsiyeed noocee ah oo kugu saabsan ayaanu ka baaraandegaynaa?

Waxaan soo ururineynaa oo ka baaraandegynaa xogo shakhsiyeedyadan adiga kugu saabsan:

- Magac
- Ciwaan
- Lambar telifoon
- iimeyl (e-post)
- Taariikh dhalasho
- Lambarka dhalasho
- DUF-nummer
- D-nummer
- Baasaboor lambar
- Lambarka imtixaanka lagu gelayo
- Jinsi
- Jawaabaha imtixaanka
- Natiijada imtixaanka
- Nooca imtixaanka
- Waqtiga imtixaanka la galey
- Nooca luqada ee imtixaanka lagu galey

- Goobta imtixaanka
- Cabasho
- Khalad
- Qish

Waxa kale oo aan ka baaraandegaynaa xoga shakhsiyeedka soo socda kuwaas oo khuseeya imtixaan galayaasha kahor 15 febarweri 2022 laga diiwangeliyey xogahan:

- Dalkaagii hore*
- Afka hooyo*

*Qeybahan xoga shakhsiyeed waxa loo arkaa iney yihiin xogo shakhsiyeedyo xasaasi ah

5. Siinta xoga shakhsiyeedka cidkale

Agaasinka waxbarashada sare iyo aqoontu ma siineyso xogahaaga khaaska ah cid kale ilaa ay jirto sabab sharci ah oo taas ogolaaneysa. Tusaalooyinka ku saabsan sabab noocan oo kale ah waxey noqon kartaa inuu jiro qiil sharci oo waajib nagaga dhigaya inaan bixino macluumaadka.

Dadka leh lambarka dhalashada, waxey natiijooyinka imtixaanka iyo xoga shaqsiyeedka la xidhiidha ka helayaan barta shahaadooyinka. **Vitnemålsportalen**.

Tusaalooyin ku saabsan hay'adaha ay Agaasinka waxbarashada sare iyo aqoontu si sharci ah usiin karto xoga shakhsiyeedka waa:

- Hay'ada isdhexgalka iyo kaladuwanaanta (IMDI)
- Degmooyinka/goobaha imtixaannada
- Badhasaabka (oo ah hay'ada ugu dambeysa ee loo dacwoodo)
- Xafiiska tirakoobka
- Agaasinka ajinebiga (UDI)
- Wasaaradda shaqada- iyo isdhexgalka bulshada
- Hay'adaha waxbarashada sare
- Sikt

Agaasinka waxbarashada sare iyo aqoontu waxey u adeegsaneysaa xog uruuriyeyaal (databehandlerer) iney soo ururiyaan, keydiyaan ama si kale uga baaraandegaan xagaha shaqsiga annaga dartayo. Xaaladaha noocaas ah, waxaan la galney heshiisyo si aan u ilaalino amniga macluumaadka ee dhammaan qeybaha ka baaraandeggida. Waxaan hadda isticmaalnaa xog uruuriyeyaasha hoos ku qoran:

- Enovate AS

Dhammaan ka baaraandeggida xog shakhsiyeedka ee aan fulino waxey ka dhacdaa gudaha aagga EU/EØS.

6. Muddada kaydinta

Waxaan kaydineynaa xoga shakhsiyeedkaaga ilaa iyo inta ay lagama maarmaan u tahay ujeedooyinka sharciga isdhexgalka § 41 faraca koowaad. Xeerka isdhexgalka § 60 faraca shanaad wuxuu dhigayaa in xoga shakhsiyeedka qofka galeya imtixaan la kaydin karo muddo ilaa 20 sanno ah laga soo bilaabo markii imtixaanka la galey. Sidaa darteed waxaan kaydin karnaa xoga shakhsiyeedkaaga ilaa 20 sanno. Muddadaas kadib waa la tirtirayaa xoga shakhsiyeedkaaga.

Xoga shakhsiyeedka hoos ku qoran ayaa muddo kooban la kaydin karaa:

- Cinwaanka waxa la kaydin karaa 2 sanno
- Duubista maqalka ee qeybta imtixaanka ee fahamka akhriska iyo wadahadalka afka ee heerka C1 waxa la kaydinayaa 1 sanno
- Macluumaadka lacag bixinta waxa la kaydina yaa 3 sanno
- Qishka hordhaca ah iyo kan kama dambaysta ah waxa la kaydinayaa 3 sanno

7. Xuquuqahaaga marka aan ka baaraandegno xoga shakhsiyeedka kugu saabsan

Waxaad xaq u leedahay inaad dalbato inaad aragto ama saxdo xog shakhsiyeedka kugu saabsan ee aan ka baaraandegayno. Waxaad sidoo kale, xaaladaha qaarkood xaq u leedahey inaad dalbato ka baaraandegid xaddidan

iyo inaad diido sida looga baaraandegayo. Waxaad ka akhriyi kartaa waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan waxa ay ka kooban yihiin xuquuqahaasi bogga netka ee Datatilsynets: **Datatilsynets nettside**.

Si aad u isticmaasho xuquuqahaaga, waa inaad noo soo dirtaa iimayl **proveadministrasjon@hkdir.no**. Waxaan kuugu soo jawaabi doonaa sida ugu dhakhsaha badan ee ugu macquulsan iyo ugu dambayn 30 maalmood gudahood.

Waxaan ku weydiin karnaa inaad xaqiijiso aqoonsigaaga ama aad na siiso macluumaad dheeraad ah kahor inta anaan kaaga soo jawaabin weydiintaada. Waxaan sidan u sameyneynaa si aan u hubino si aanaan u siin xog shakhsiyeedkaaga cid kale oo aan adiga ahayn, ama siino xoga shakhsiyeedkaaga cid kale oo adiga iska kaa dhigaysa.

8. Wakiilka dhowrida shakhsiga (Personvernombud)

Agaasinka waxbarashada sare iyo aqoontu waxey leedahey wakiilka dhowrida shakhsiga oo u gaar ah. Wakiilka gaarka ah waa Torgeir Hovden, waxaana la gala xidhiidhi karaa ciwaanka iimeylka personvernombud@hkdir.no.

9. Cabasho

Haddii aad aaminsantahey in ka baaraandegidayada xogta shakhsi aaney waafaqsaneyn waxa aan halkan ku sharaxney ama aan siyaabo kale u jebino sharciga dhowrida xogta shakhsiga, markaa waxaad u dacwoon kartaa Laanta ilaalinta xogta (Datatilsynet).

Waxaad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan sida aad ula xidhiidhi karto Laanta ilaalinta xogta (Datatilsynet) boggaga **Datatilsynets nettsider**.

10. Isbedelo

Haddii ay wax isbedelo ah ku yimaadaan adeegyadayada ama qawaaniinta ku saabsan ka shaqeynta xoga shakhsiyeedka, waxey sababi karaan isbedelo ku yimaada macluumaadka aad halkan ka heshay. Bayaankan ku saabsan ilaalinta

xogta shakhsiga ah waa la cusboonaysiin doonaa waxaana laga heli karaa boggayaga internetka.

11. Macluumaadka xidhiidhka

Maclumaadaaka la xidhiidhka Agaasinka waxbrashada sare iyo aqoonta waa:

Cinwaan: Fortunen 1, 5013 Bergen
Iimeyl: **post@hkdir.no**
Telifoon: 55 30 38 00
Lambarka ururka: 974788985

Haddii aad qabto su'aal ku saabsan sida aan uga baaraandegayno xogahaaga shakhsiyeed, waxaad iimeyl u soo diri kartaa **proveadministrasjon@hkdir.no**.